

## **Bulshada culeys weyn baa saaran**

**Sawirka xaaladda guud ee  
mushkiladda caabuqa karoonaha  
waxaa ka muuqata inuu saameyn ku  
yeeshay bulshada inteeda badan.**

Todobaad walba wuxuu maamulka gobolka warbixino ka soo ururiyaa maamulada degmooyinka gobolka. Kadib maamulka gobolku wuxuu sameeyaa sawir guud oo uu ku ogaanayo sida xaaladda gobolka Kalmar ay u egtahay. Marka warbixinadaas oo idil leysu wada geeyo waxaa laga fahmi karaa saameynta uu bulshada ku yeeshay cudurkan. Waxaa kaloo la ogaan karaa hawsha ay qabtaan mas'uuliyiinta kala duwan si xaaladdu u hagaagto.

Sawirka todobaadkan wuxuu tusayaa in inta badan qaybaha bulshada gobolka ku nool uu saameyn ku yeeshay mushkiladda caabuqa koroonaha.

Degmooyinku waxay kaloo wel wel ay ka qabaan carrurta joogta guriga oo in badan ka maqan dugsiga iney dhibaatooyin la kulmi doonaan. Guryaha qaarkood

carruurta nabadgelyo kuma haystaan. Waxaa la ogyahay iney kordhaan rabshadaha ka dhaca guryaha iyo cabitaanka khamriga markey dadku shaqo la'aan ku dhacdo oo ay guryaha fadhiyaan. Sida caadiga ah macalimiinta ayaa ogaada xaallada carrurta, laakiin wey adagtahay taas markey waalidiintu carruurta guriga ku hayaan. Haddi la ogaado in carrurta la kulmaan jir dil ama cunto xumo, waa in lasoo sheegaa si loo caawiyo qoyska. Waxaa kaloo jira wel wel ku beegan dhalinyarada iney la kulmaan isticmaalka daroogada iyo falalka denbiyada, maadaama aaney hadda iskuulka tegin.

Maamulka degmooyinka, guddiga gobolka iyo dhammaan hay'adaha kale ee gobolka waxa ay is weydaarsadaan warbixinno ,isna caawiyaan. Qof kasta waa in uu qeybtiisa ka qaataa is gargaaridda , taasina waxa ay ku suurtoobi kareysaa iyada oo la raaco talo soo jeedinta hay'adda caafimaadka dadweynaha

**Gacmaha iska dhaq \* Kala fogaada \*  
Hana safrin.**



Hay'adda ka hortaga masiibooyinka ee gobolka Kalmar waxay wada shaqen ka dhaxaysaa dhammaan degmooyinka gobolka Kalmar, Maamulka iyo dhammaan hay'adaha dawliga ee gobolka ka jira. Dhibaataada ku timaada mujtamaca wadajir ayaa loo go'aamiyaa la iskana kaashada. Hadda waxaa intii suurtoogala si fiican loola tacaalaya cudurka corona.

